



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Diisambar 11, 2020

Ku socota: Hay'adaha Maamulka Kiiska iyo Daryeel Bixiyayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Xilliga Fasaxa iyo Waxyaabaha la filayo

Waan uga mahad celinayaa dadaaalka weyn iyo shaqada adag ee hay'adaha maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaasha tan iyo markii uu horreysay ee cudurka baahsan ee COVID-19 uu bilaabmay.

Nidaamkayaga ayaa si weyn isku beddelay si dadka looga caawiyo in ay noqdaan kuwo caafimaad iyo badbaado ku sugan, iyada oo shaqadiinu ay tani suurtagal ka dhigtay. Waan mid aan mahadinayo maalin kasta shaqada aad dhammaantiin maalin kasta qabataan.

Inta lagu jiro xilligan fasaxa ah, waan ogahay in ay adag tahay in aan la awoodin in si wadajir ah loogu dabaaldego sidii aan hore u sameyn jirnay. Xafladaha fasax, iyo dabaaldegada xafiisyada iyo isku imaanshuhu waa in uu sidii hore ka duwanadaa sanadkani oo waafaqsanaadaa [Amarka Amarka Fulineed ee Guddoomiyaha Gobolka](#), [xeerarka OSHA ee loogu talagalay goobaha shaqada](#), oo aan xaqiijinaa in aanu sameynayno wax kasta oo suurtagal ah oo lagu yareynayo halista uu u leeyahay dadka aanu u adeegno. Waan ogahay in aanu doonayno in aan dabaaldegno oo aqoonsano dadaalada shaqaalaha – Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah (DSP), Isku duwayaasha Adeegyada, Wakiilada Shakhsiyeed iyo kuwa kale – ee taageeraya dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyada oo ay jiraan durufo aad u adagi.

Waxaad raadisaan siyaabo hal-abuur leh oo lagu dabaaldego shaqaalaha, sida tartanka funaanada fool xumada badan oo ah dhanka muuqaalka internet-ka ama isdhaafsiga hadiyada oo ah dhanka muuqaalka internet-ka.

Ilaaha loogu talagalay dabaaldegyada fasaxyada waxaa ka mid ah [tilmaamo ka socda Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka](#) iyo [fikradahan hal-abuurka leh ee xafada dhanka muuqaalka internet-ka oo ka socota CNN](#). Fikradahani waxay sidoo kale dadka aad taageertaan ka caawin karaan in ay si ammaan ah ula dabaaldegaan asxaabtooda iyo qoysaskooda.

Xilliyada fasaxa ee mustaqbalka waxaa ku jiri doona isku imaanshaha shakhsi ahaaneed sidii aan hore u sameyn jirnay, balse hadda, waa in aanu sameynaa wax kasta oo suurtagal ah si aan nafteeda iyo ta dadka aanu taageerno uga dhigno mid badbaado iyo caafimaad ku sugan.

Waad ku mahadsan tihiin wax kasta oo aad sameysaan si aad u taageertaan dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo qoysaskooda.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.